Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay: https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx.

Janaayo 6, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka
Ujeedada: Sanad Cusub Oo Wanaagsan — Dib u jaleecida 2021

Sanad Cusub Oo Wanaagsan! Waxaan rajeynayaa in aad yeelatay xilliga fasaxa oo wanaagsan.

Inaga oo gelnay 2022, waxaan rabaa in aan dhammaantiin idiin mahadceliyo, shaqaalaha ODDS, hawl-wadaagayaasha iyo daryeel bixiyayaasha Hay'ada Maamulka Kiiska (CME) ee gobolka oo dhan, iyo dadkii iskood isu xilqaamay ama dadaalka muujiyay si ay isbeddel wanaagsan ugu sameeyaan noloshada dadka reer Oregon ee qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) sanadkii 2021. Waad ku mahadsan tahay dadaalkaagii, daryeelkaagii, shaqadaadii adkeyd iyo wax huridaadii.

Wuxuu ahaa sanad kale oo adag oo uu jiray cudurka baahsan, roobab baraf wata, dabka kaymaha, hanfiga kulaylka iyo shaqaale yaraan. Waxaan mahad gaar ah u soo jeedinayaa dhammaan intiina dadaalka muujisay si ay u taageeraan dadaalada tallaalka COVID-19 iyo tallaalka xoojinta, si loo tababaro oo loo qaato shaqaale cusub, iyo gaar ahaan kuwiina daryeelayay dadka ay saameeyeen COVID-19 iyo cimilada aadka u daran. Hoggaanka ODDS iyo aniguba waxaan bixinaynaa mahadnaq qoto dheer.

Iyadoo ay jiraan caqabadaha 2021, bulshada ODDS ayaa yeeshay guulo badan oo ay gaareen oo mudan in la xuso. Waa kuwan kuwo dhowr ah:

- Iyada oo laga jawaabayo codsiyada hawl-wadaagayaasheena, waxaanu bilawnay ImpactOregon.careers bisha Janaayo. ODDS daryeel bixiyayaasha ay leedahay iyo hay'adaha maamulka kiiska waxay hadda soo dhejin karaan shaqooyinka furan oo lacag la'aan ah.
- Ka dib saxiixii uu Madaxweyne Biden saxiixay Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka (ARPA) oo noqday mid sharci ah Maarso, shaqaalaha ODDS, hawl-wadaagayaasha, daryeel bixiyayaasha iyo dadka u dooda naftooda ayaa si wadajir ah uga shaqeeyay in ay dejiyaan qorshe loogu talagalay xirmada gargaarka ee COVID-19 ee ODDS oo federaalku maalgeliyo oo gaaraysa $160 milyan. dhawr tusaale oo ah wixii aanu ku qabanay maalgelinta ayaa ah deeqda lacageed ee shaqaaleysiinta iyo sii haysashada shaqada oo loogu talagalay xirfadlayaasha taageerada tooska ah, deeqda lacageed oo loogu talagalay taageerada hawlaha maalintii, iyo dadaalada maalgelineed ee gobolka oo dhan si dib loogu dhiso xooga shaqadeena. Qorshayaasha loogu talagalay deeqda lacageed ee ay maalgeliso ARPA oo badan, oo ay ku jiraan kuwa loogu talagalay qorshayaasha Adeega Sinnaanshaha, ayaa hadda socda.
- Markii u horreysay muddadan labada sanadood ah 'biennium', ODDS ayaa qiimeynta adeega sinnaanshaha iyo qorshayaasha uga baahday CME.
- Xagaagan, waxaa nasoo wajahday caqabad weyn markii Mentor Oregon, oo ahaa mid ka mid ah daryeel bixiyayaashayadii ugu weynaa iyo hay'ada maamulka kiisku, uu ka tegay gobolka. Waxaanu haysanay 90 maalmood in aanu in ka badan 1,300 oo qof ugu wareejino adeegyada maamulka kiiska iyo daryeel bixiyayaal cusub. Waad ku mahadsan tihiin, dhammaantiin ee jooga hay'ada daryeel bixiyayaasha, ururada iskaashiga lala leeyahay iyo ODDS ee ka dhigay in ay tani dhacdo.
- Bishii Juun, Sharci dejinta Oregon ayaa ansixisay miisaaniyada 2021–23 oo ay ku jiraan maalgelin taariikhi ah oo dhan $1.24 bilyan oo lagu sameeyay nidaamka I/DD ee gobolka. Maalgelintani waa mid sii wadi doonta in ay isbeddel weyn u keento nolosha kuwa qaba I/DD.
- Intii lagu jiray deyrta ee shaqaale yaraanta koradhay, ODDS iyo ODHS ayaa bilaabay dadaalka taageerada shaqaalaha si loo taageero daryeel bixiyayaasha oo loo caawiyo dadka ugu badan ee suurtagalka ah in ay si ammaan ah ugu sugnaadaan guryahooda.

Bishii Diisambar iyo iyada oo laga jawaabayo talooyinka daryeel bixiyayaasha, ODDS ayaa cusbooneysiisay nidaamka iyada oo ilaha iyo qandaraaska loo wareejinayo daryeel bixiyayaasha. Dadaalkaasi ayaa shaqaalaha ODDS iyo daryeel bixiyayaasha uga baahan in ay qabtaan shaqo wanaagsan oo ah dhanka waajibaadkooda shaqo. Waad mahadsan tihiin dhammaan intiina dadaalka muujisay.

- Iyada oo laga jawaabayo shaqaale yaraanta, Kooxda Xasilinta Dhibaatooyinka (SACU) ayaa shaqaaleysiisay oo tababartay in ka badan 100 shaqaale oo qandaraas lala leeyahay taasi oo ahayd muddo dhowr toddobaad ah waxayna qabatay carwadeedii shaqaaleysiinta dhanka internet-ka ee ugu horreysay. SACU ayaa si badbaado leh 27 ah dadka goobta degan ugu wareejisay qaybta gaarka ah.
- Si loo taageero shaqaalaha iyo dadka degan, SACU ayaa la kulantay Booliska Gobolka Oregon oo hay'adaha fulinta sharciga ee degaanka u dirtay macluumaad si ay uga caawiso in ay si wanaagsan u fahmaan SACU iyo sida jawaabtooda ay ka bixiyaan dhacdooyinka muhiimka ay u saameyn karto shaqaalaha SACU iyo dadka degan ee midabyada kala duwan leh. SACU ayaa sidoo kale hirgelisay hab cusub oo gudaha ah oo macluumaadka dhacdada muhiimka ah loo helo.

Kuwani waa dhowr waxyaabood oo muhiim ah oo ka socda sanadka. Waad ku mahadsan tihiin dhammaan, dadaalkiina joogtada ah ee la xiriira hawsheena iyo iskaashiga si loo bixiyo adeegyo iyo taageero awood lagu siinayo in dadka reer Oregon ee qaba I/DD ay nolol buuxda ugu noolaadaan bulshadooda dhexdiisa.

Waxaan rajeynaynaa in 2022 uu kuu keeni doono caafimaad wanaagsan iyo farxad badan.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.